



MAAMULKA SSC-KHAATUMO
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA
XEERKA SIYAASADDA MIISAANIYADDA

DRAFT

Tusmada Xeerka

Tusmada Xeerka.....	2
Tusmada Shaxaha Xeerka	4
Qodobka 1aad: Guudmar	5
Qodobka 2aad: Dhammeystirka Erayada Laa Gaagaabiyey	5
Qodobka 3aad: Eray Bixin	6
Qodobka 4aad: Sanadka Maaliyadeedka Maamulka SSC-Khaatimo.....	7
Qodobka 5aad: Mabaadi'da Miisaaniyadda.....	7
Qodobka 6aad: Ujeedooyinka Xeerka Siyaasadda Miisaaniyadda	7
Qodobka 7aad: Meertada Miisaaniyad Diyaarinta	6
Qodobka 8aad: Qaabdhismeedka Miisaaniyadda.....	7
Qodobka aad: Ka Qaybqaatayaasha Miisaaniyadda	7
Qodobka 9aad: Doorarka Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda.....	7
Qodobka 10aad: Doorarka Wasiirka Maaliyadda.....	8
Qodobka 12aad: Doorarka Wasiirrada WWW	9
Qodobka 13aad: Doorarka Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha Baarlamaanka (GHGB)	9
Qodobka 14aad: Jedwelka Diyaarinta Miisaaniyadda	10
Qodobka 15aad: Diyaarinta Waraaqda Muuqaalka Miisaaniyadda (WMM) (Budget Outlook Paper)	12
Qodobka 16aad: Diyaarinta Muuqaalka Dhaqaalaha Guud (MDHG) (Macroeconomic and Fiscal Framework (MFF)).....	13
Qodobka 17aad: Diyaarinta Miisaaniyadda Muddada Dhexe (MMDH) (Medium-Term Budget Framework (MTBF))	13
Qodobka 18aad: Diyaarinta Miisaaniyadda.....	14
Qodobka 19aad: Ansixinta Miisaaniyadda	14
Qodobka 20aad: Fulinta Miisaaniyadda	14
Qodobka 21aad: Oggolaansho Kharash Bixinta	14
Qodobka 22aad: Kala wareejinta Qondooyinka Miisaaniyadda.....	15
Qodobka 23aad: Dhicitaanka Qoondooyinka Dabayaaqada Sannad Maaliyadeedka	15
Qodobka 24aad: Dakhliga Dheeriga ah	16
Qodobka 25aad: Kharash Dheeri ah.....	16

Qodobka 26aad: Qoondeynta Lama Filaanka ah	16
Qodobka 27aad: Miisaaniyad Kaabis.....	16
Qodobka 28aad: Miisaaniyad Gaar ah.....	17
Qodobka 29aad: Miisaaniyadda Ku Meelgaadhka (Vote on Accounts)	17
Qodobka 30aad: Xisaabinta iyo Waxbixinta Miisaaniyadda	18
Qodobka 31aad: Dib u eegista Warbixinta Maaliyadeed	18

DRAFT

Tusmada Shaxaha Xeerka

Shaxda 1: Dhammeystirka Erayada Laa Gaagaabiyey	5
Shaxda 2: Jedwelka Diyaarinta Miisaaniyadda	10
Shaxda 3: Jedwelka Ansixinta Miisaaniyadda.....	11
Shaxda 4: Jedwelka Fulinta Miisaaniyadda	11
Shaxda 5: Jedwelka Xisaabcelinta Miisaaniyadda	11

DRAFT

Qodobka 1aad:

Guudmar

Wasaaradda Maaliyadda ee SSC-Khaatumo iyada oo ka wakiil ah ilaalinta hantida iyo lacagta dadweynaha, waxa loo igmaday in ay dejiso siyaasad dhaqaale iyo mid maaliyadeed oo sugan iyo in ay si hufan u ururiso ilaha dhaqaale ee gudaha iyo dibaddaba si ay wax uga qabato adeegga dawladda.

Sida uu dhigayo Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud, Xeer Lr1, 2023 ee SSC-Khaatumo, "Habka diyaarinta, dhaqangelinta, xisaabaadka iyo baadhista Miisaaniyadda Dawladda waxa go'aamin doona Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda ee Xeer 1/2023 iyo Xeerkan oo qeexaya habraaca diyaarinta, ansixinta iyo xisaabinta Maaliyadda Dawladda.

Maamulka Maaliyadda Guud (MMG) waxay la xiriirtaa hannaanka ay dowladdu u maamusho qulqulka maaliyadeed ee Dawladda sida: kobcinta korriinka, yaraynta sinnaan la'aanta, iwm.

MMG ee wanaagsani waa in uu horumariyaa go'aan gaadhista, hagaajiyaa maaliyad dawladda oo fayow, xaqiijiyaana in si hufan loo ururiyo loona adeegsado wax ka qabashada baahiyaha muwaadiniinta.

Si gaar ah, MMG ee wanaagsani waa inuu kor u qaadaa: gaadhista go'aamo maaliyadeed oo taxaddar leh, miisaaniyad la aamini karo, qulqulka kheyraadka oo la isku halayn karo oo hufan, iyo dhiirrigelinta isla xisaabtanka hay'adaha dawladda.

Jaantuska 1 ee hoose wuxuu muujinayaa heerarka caadiga ah ee wareegga MMG oo leh dhowr xaaladood oo isku mar dhacaya. Tusaale ahaan, diyaarinta miisaaniyada sanadka soo socda waxay ku beegan tahay fulinta miisaaniyada sanadkan.

Qodobka 2aad:

Dhammeystirka Erayada La Gaagaabiyey

Shaxda 1: Dhammeystirka Erayada La Gaagaabiyey

WMM	Waraaqda Muuqaalka Miisaaniyadda
MDHG	Muuqaalka Miisaaniyadda Guud

MMDH	Misaaniyadda Muddada Dhexe
GSM	Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda
WWW	Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaalada
GHGB	Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha Baarlamaanka

Qodobka 3aad:

Eray Bixin

“Ballanqaadka”: waxaa loola jeedaa waajib sharciyeed oo leh fullin qasab ah oo lacag bixineed.

“Hanti-Dhawraha”: Waxa loola jeedaa sarkaalka u xilsaaran ama leh awoodda Xafiiska Hanti-Dhawrka ee sameeya baadhitaanada iyo dabagalka xisaabaadka iyo maamulka maaliyadda guud ee dawladda.

“Hantidhawrida Gudaha”: Waxaa loola jeedaa habka lagu cabiro, qiimeeyo, laguna warbixiyo maamulka hay’adeed ee la xidhiidha hufnaanta nidaamka dakhli uruurinta iyo kharash bixinta dawladdu inay waafaqsan tahay xeerka qoondada miisaaniyadda dawladda.

“Hay’ad Dawladeed”: Waxaa loola jeedaa wasaarad, waax, wakaalad dawladeed ama hay’ad kasta oo kale oo dawladda ka tirsan.

“Miisaaniyad”: Waxaa loola jeedaa hanaanka ay dawladdu u odorska dakhliga iyo kharashaadka dawladda si loo gaadho hiigsiga dawladda.

“Sannad-Maaliyadeed”: Waxaa loola jeedaa muddo laba iyo toban bilood ah oo ka bilaabanta 1da Janaayo kuna eg 31ka Diseembar;

“Sarkaal Igman”: Waxaa loola jeedaa qofka haya, ama matalaya xafiis dawladda u adeega oo maamulaya kayd xisaabeed.

“Wasiir”: Waxaa loola jeedaa wasiirka ka masuulka ah maaliyadda;

“Xeerka Qoondada”: Waxaa loola jeedaa xeer kasta oo lagu dalbanaayo qadar lacag ah oo laga saarayo Kayda Dakhliga Guud si loogu kabo adeega sannad maaliyadeedka.

“Xisaabiyaha Guud”: Waxa loola jeedaa sarkaalka u xilsaaran ama leh awoodda Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

Qodobka 4aad:
Sanad Maaliyadeedka Maamulka SSC-Khaatimo

- a) Sannad maaliyadeedka Maamulka SSC-Khaatimo waxa uu ka bilaabmi doonaa maalinta kowaad ee bisha Janaayo wuxuuna dhamaanayaa soddon iyo kowda bisha Diseember.

Qodobka 5aad:
Mabaadi'da Miisaaniyadda

- a) Hay'adaha dawladdu waa in aanay kharash-garayn wax ka badan inta loogu oggolaaday miisaaniyadda la ansixiyey, waana in ay u adeegsadaan keliya ujeedooyinka lagu caddeeyey miisaaniyadda la ansixiyey.

Qodobka 6aad:
Ujeedooyinka Xeerka Siyaasadda Miisaaniyadda

Ujeedooyinka Xeerka Siyaasadda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda waxaa ka mid ah:

1. In la sameeyo hannaan iyo habraac isku mid ah oo loogu talagaley diyaarinta, fulinta, iyo la socodka miisaaniyadda dhammaan Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaaladaha dawladda (WWW).
2. In la fududeeyo wada-shaqeynta iyo la-tashiyada dhinacyada kala duwan, oo ay ku jiraan deeq-bixiyeyaasha, taageerayaasha miisaaniyadda, bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, ee geeddi-socodka miisaaniyadda.
3. In la helo qaab-dhismeedka qiimaynta waxtarka iyo hufnaanta qoondaynta miisaaniyada si loo gaaro ujeedooyinka dawladda.
4. In la xaqiijiyo u hoggaansanaanta xeerarka, qawaaniinta, iyo siyaasadaha lagu maamulayo maaliyadda guud.
5. In la yareeyo, lana aqoonsado khataraha la xidhiidha fulinta miisaaniyada iyo warbixinta maaliyadeed.
6. In la hubiyo in qoondada miisaaniyaddu la jaanqaado qorshayaasha horumarinta maamulka iyo kuwa qaranka.
7. In la helo habraac miisaaniyadeed si kor loogu qaado kalsoonida bulshada iyo la xisaabtanka maamulka maaliyadda dawladda.

8. In kor loo qaado qoondaynta iyo ka faa'iidaysiga kheyraadka si loo gaaro mudnaanta dowladda loona hagaajiyo bixinta adeegga.
9. In la kobciyo xirfadaha iyo aqoonta shaqaalaha ku lug leh diyaarinta miisaaniyada iyada oo loo marayo ku tababarka xeerkan.
10. In la horumariyo habdhaqanka adeegsiga maaliyadeed si loo xaqiijiyo maaliyadda guud oo waarta loogana fogaado hoos u dhac xad dhaaf ah.

DRAFT

Qodobka 7aad:
Meertada Miisaaniyad Diyaarinta

Jaantus 1: Meertada Miisaaniyad Diyaarinta

WEJIGA 1AAD: DIYAARINTA HIIGSIGA FOG

1. Hiigsiga Qaranka/Maamulka (AQ/M)
2. Qorshaha Horumarinta Qaranka/Maamulka (QHQ/M)
3. Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Qaranka/Maamulka (QIQ/M)
4. Qiimeynta Dhaqaalaha Guud (QDHG)
5. Qiimeynta Miisaaniyadda Muddada-dhexe (QMMDH)

WEJIGA 2AAD: DIYAARINTA MIISAANIYADDA

1. Wareegtada Wargelinta Miisaaniyadda
2. Soo jeedinta miisaaniyadda WWW
3. Gorgortanka iyo Wadaxaajoodka Miisaaniyadda
4. Diyaarinta Miisaaniyad Dhammeystiran

WEJIGA 3AAD: FULINTA MIISAANIYADDA

1. Fasixidda iyo Siideynta Qoondada
2. Lacag bixinta Kharashaadka
3. Lacag bixinta Wax soo iibsiga
4. Xakamaynta/Baadhista Hanti-dhawrida Gudaha

WEJIGA 4AAD: XISAABINTA IYO WARBIXINTA MIISAANIYADDA

1. Warbixinnada Maaliyadda
2. Warbixinnada Waxqabadka
3. Xisaabaad-xidhka Sannadlaha ah
4. Warbixinnada Akoonada

WEJIGA 1AAD: BAADHISTA HANTI-DHAWRKA GUUD

1. Baadhista Hanti-dhowrka Guud
2. Guddiga Xisaabaadka Guud ee Golaha Shacabka

Qodobka 8aad:
Qaabdhismeedka Miisaaniyadda

- a) Miisaaniyad dhammaystirani waxay ka tarjumaysaa dakhliga iyo kharashka sannadka soo socda, waxayna faahfaahineysaa noocyada dakhliga iyo noocyada kharashaadka dawladda.

Noocyada Dakhliga	Noocyada Kharashka
• <i>Canshuuraha</i> • <i>Khidmadda Adeegyada</i> • <i>Kirada Guryaha</i> • <i>libka Hantida</i> • <i>Deymo soo Xaroodey</i> • <i>Deeqaha iyo Kabka</i> • <i>Amaah Qaadasho</i>	• <i>Kharashka Joogtada ah (Line Budgets)</i> • <i>Kharashka Mashaariicada (Program Budgets)</i> • <i>Kharashka Hawlgallada (Performance Budgets)</i> • <i>Kharashka Soo-libsashada Hantida (Capital Budgets)</i>

Qodobka 9aad:
Ka Qaybqaatayaasha Miisaaniyadda

- a) Diyaarinta miisaaniyad dhammaystirani waxay u baahan tahay inay ka qayb qaataan dhammaan hay'aha dawladda, ha ahaadaan kuwo dakhli soo saara ama kuwo kharash gareeya, si gaar ah waxaa lagama maarmaan inay ka qayb qaataan diyaarinta miisaaniyadda dawladda saraakiisha maaliyadda iyo xisaabaadka ee Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaalada (WWW) dawladda, sida:
- i. Agaasimeyaasha iyo Saraakiisha Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda.
 - ii. Saraakiisha iyo Agaasimeyaasha Maamulka iyo Maaliyadda ee laamaha dawladda.
 - iii. Saraakiisha Xafiiska Xisaabaadka Guud.
 - iv. Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda.
 - v. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Qodobka 10aad:
Doorka Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda

- a) Doorka Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda waa in ay ka doodaan oo ansixiyaan siyaasadda dhaqaalaha guud ee maamulka iyo jaangoynta kharashaadka hortebinta leh sanadka soo socda iyo muddada dhexe.

- b) Guddigu wuxuu kaloo ansixiyaa Muuqaalka Dhaqaalaha Guud (MDHG) iyo Miisaaniyadda Muddada Dhexe (MMDH), ka hor intaan loo gudbin Golaha Wasiirada iyo Golaha Shacabka.
- c) Guddigu waxay ka baaraandegaan go'aannada siyaasadda ee ku salaysan saadaasha halbeegyada dhaqaalaha guud iyo jaangooyada kharashaadka (budget ceiling):
- I. Jaangooynta qoondada kharashka joogtada ah.
 - II. Jaangooynta qoondada hantida.
 - III. Jaangooynta qoondada kharashka lama-filaanka ah (budget ceiling).
 - IV. Jaangooynta wadarta kharashka dawladda.
 - V. Meelmarinta siyaasadda maaliyadda iyo lacagta.
 - VI. Jaangooynta kharashaadka hortebinta leh.

Qodobka 11aad:

Doorka Wasiirka Maaliyadda

- a) Wasiirka Maaliyaddu waxa uu hormuud ka yahay dejinta iyo hirgelinta siyaasad dhaqaale oo hufan oo Maamulka SSC-Khaatumo u horseeda horumar waara. Si kale haddii loo dhigo, Wasiirka Maaliyaddu wuxuu masuul ka yahay hirgelinta Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.
- b) Intii lagu jiro dejinta qorshaha istiraatiijiga ah iyo diyaarinta miisaaniyadda, doorka wasiirku waa:
- i. Jeedinta Waraaqda Muuqaalka Miisaaniyadda (WMM), Muuqaalka Miisaaniyadda Guud (MDHG) iyo Misaaniyadda Middada Dhexe (MMDH) ee Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda (GSM) si ay dib u eegis iyo talobixin ugu sameeyaan warbixinahaas.
 - ii. Shir guddoominta shirarka GSM si loo xaqiijiyo siyaasad dhaqaale oo cad, leh ujeedooyin iyo yoolal la cayimay sanad xisaabeedka soo socda iyo muddada dhexe.
 - iii. La wadaagidda WMM, MDHG iyo MMDH ee Golaha Wasiirada iyo Guddiga Hoosaadka Dhaqaalaha ee Baarlamaanka si ay uga talobixiyaan
 - iv. La tashiga Guddiga Hoosaadka Dhaqaalaha ee Baarlamaanka (GHDHB).
 - v. Saxeexidda Wareegtada Wargelinta Miisaaniyadda iyo la wadaagidda dhammaan WWW-yada si loo hubiyo wax ka qabshada talo-soojeedinta Guddiga Hoosaadka Dhaqaalaha Baarlamaanka ee ku aaddan warbixinnada: WMM, MDHG iyo MMDH.
 - vi. Shir guddoominta wada xaajoodka iyo gorgortanka miisaaniyadda ee u dhexeeya WM iyo WWW. Hawshan waxa mararka qaarkood loo igmankaraa Wasiir ku-xigeenka marka uu wasiirku haleeliwaayo.

- vii. Jeedinta iyo la wadaagidda Golaha Wasiirada qabyo qoraalka koowaad ee hindise sharciyeedka miisaaniyada.
- viii. Jeedinta iyo la wadaagidda Golaha Shacabka qabyo qoraalka koowaad ee hindise sharciyeedka miisaaniyada ee Golaha Wasiiradu ansixiyeen.
- ix. Ka jawaabaya su'aalaha, faahfaahinta miisaaniyadda iyo meel marinta soo jeedinta Golaha Shacabka.
- x. Soo saaridda wareegtada wargelinta fulinta miisaaniyadda oo ku socota dhammaan WWW-yada bilowga sanad-maaliyadeedka oo lagula talinayo inay fuliyaan miisaaniyada baarlamaanku ansixiyay, hoggaamiyuhuna saxiixey.
- xi. Hubinta u hoggaansanaanta guud, dhaqangelinta Miisaaniyadda Baarlamaanku ansixiyey, mudnaan siinta siyaasadda, ujeedooyinka iyo yoolalka.
- xii. Hogaaminta qorista miisaaniyad kasta oo dheeri ah oo loo arko inay lagama maarmaan tahay inta lagu jiro sanad-maaliyadeedka.

Qodobka 12aad:

Doorka Wasiirrada WWW

- a) Doorka Wasiirrada hoggaamiya WWW-yada kala duwan ee qorshaha istiraatiijiyadeed iyo wejiga diyaarinta miisaaniyadu waxaa ka mid ah:
 - i. Talo soo jeedinta haddii ay qayb ka yihiin guddiga GSM
 - ii. Qiimaynta siyaasadaha, ujeedooyinka, bartilmaameedyada iyo odoroska kharash tilmaamayaasha ee MDHG iyo MMDH inta lagu guda jiro shirarka Golaha Wasiirada
 - iii. Hogaaminta diyaarinta miisaaniyadahooda kala duwan iyo hubinta u hoggaansanaanta siyaasadaha la ansixiyay iyo kharashaadka la jaangooyey.
 - iv. Ka talobixinta qabyo-qoraalka koowaad ee Hindise Sharciyeedka Miisaaniyadda marka uu Wasiirka Maaliyaddu u gudbiyo Golaha Fulinta.

Qodobka 13aad:

Doorka Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha Baarlamaanka (GHGB)

- a) Doorka Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha Baarlamaanka waa
 - i. Qiimeeynta iyo ka talo bixinayaa odoroska miisaaniyad sanadeedka maamulka,
 - ii. Jeedinta warbixinta miisaaniyadda ee Gole weynaha Baarlamaanka.

Qodobka 14aad:

Jedwelka Diyaarinta Miisaaniyadda

- a) Jedweleynta shaqooyinka la xidhiidha diyaarinta miisaaniyaddu waxay gacan ka geysanayaan go'aan gaadhista xilligeeda ku dhacda.

Shaxda 2: Jedwelka Diyaarinta Miisaaniyadda

Tal	Shaqooyinka Miisaaniyad Dejinta	Hoggaan	Muddada
1	Diyaarinta Warqadda Muuqaalka Miisaaniyadda (WMM)	WM - Waaxda Dhaqaalaha Guud	15ka Meey
2	Jaangooyneysa kharashka hortebinta leh	Guddiga Siyaasadda Miisaaniyaddu	30ka Meey
3	Diyaarinta Muuqaalka Dhaqaalaha Guud (MDHG)	WM - Waaxda Dhaqaalaha Guud	30ka Meey
4	Diyaarinta Miisaaniyadda Muddada Dhexe (MMDH)	WM - Waaxda Miisaaniyadda	30ka Juun
5	Jeedinta iyo la wadaagaa MDHG iyo MMDH Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda si ay uga talo bixiyaan arrimaha mudnaanta leh	Wasiirka Maaliyadda	1da Luulyo
6	La tashanayaa Guddiga Hoosaadka Dhaqaalaha ee Baarlamaanka (GHDHB)	Wasiirka Maaliyadda	5ta Luulyo
7	Abaabulka dhageysiga talo bixinta bulshada	WM - Waaxda Miisaaniyadda	10ka Luulyo
8	Dejinta jaangooyada kharashaadka joogtada ah (expenditure ceilings)	WM - Wasiirka Maaliyadda	20ka Luulyo
9	Diyaarinta iyo soo gudbinta soo jeedinta miisaaniyadda laamaha dawladda	WWW - Wasaaradaha, Waaxyaha, Iyo Wakaaladaha	1da Ogosto
10	Wada-xaajoodka, gorgortanka iyo mideynta soo jeedinta WWW-yada	WM, Waaxda Miisaaniyadda iyo WWW	15ka Ogosto

Shaxda 3: Jedwelka Ansixinta Miisaaniyadda

Tal	Shaqooyinka Miisaaniyad Dejinta	Hoggaan	Muddada
11	Jeedinta iyo u gudbinta Golaha Fulinta Miisaaniyadda Mideysan	WM - Waaxda Miisaaniyadda	1da Sebteember
12	Ansixinta Miisaaniyadda ee Golaha Fulinta	Golaha Fulinta	15ka Sebteember
13	Jeedinta iyo u gudbinta Baarlamaanka miisaaniyaddii golaha fulintu ansixiyeen	WM - Wasiirka Iyo Waaxda Miisaaniyadda	1da Aktoober
14	Dhageysiga talobixinta Baarlamaanka ee Miisaaniyadda loo soo gudbiyay	Guddiga Hoosaadka Dhaqaalaha Ee Baarlamaanka	15ka Aktoober
15	Ansixinta Miisaaniyadda ee Golaha Baarlamaanka	Golaha Shacabka	31ka Aktoober
16	Soo saarista waraaqda ansixinta Miisaaniyadda	Guddoomiyaha Golaha Shacabka	5ta Noofeember
17	Saxeexidda iyo meelmarinta Miisaaniyadda Golaha Baarlamaanku ansixiyey	Hogaamiyaha Fulinta	15ka Noofeember

Shaxda 4: Jedwelka Fulinta Miisaaniyadda

Tal	Shaqooyinka Miisaaniyad Dejinta	Hoggaan	Muddada
18	Wargelinta WWW-yada inay dhaqangelayaan Miisaaniyadda la ansixiyay	Wasiirka Maaliyadda	15ka Diseember
19	Fulinta iyo dhaqangelinta Miisaaniyadda la ansixiyay	WWW - Wasaaradaha, Waaxyaha, Iyo Wakaaladaha	1da Janaayo

Shaxda 5: Jedwelka Xisaabcelinta Miisaaniyadda

Tal	Shaqooyinka Miisaaniyad Dejinta	Hoggaan	Muddada
-----	---------------------------------	---------	---------

20	Diyaarinta iyo soo gudbinta warbixinta Saddex-biloodlaha	Dhammaan WWW Dawladda	Saddex-biloodkasta
21	Diyaariyaa xisaabxidhka iyo Warbixinta Maaliyadeed	WM - Xisaabiyaha Guud	15ka Maarso
22	Ansixinta Xisaabxidhka iyo Warbixinta Maaliyadeed ee Xisaabiyaha Guud soo gudbiyey	Golaha Wasiiraddu	31ka Maarso
23	Baadhidda Xisaabxidhka iyo Warbixinta Maaliyadeed ee Xisaabiyaha Guud soo gudbiyey, Golaha Wasiiraduna na ansixiyeen	Hanti-Dhowrka Guud	1da Maarso – 30ka Abriil

Qodobka 15aad:

Diyaarinta Waraaqda Muuqaalka Miisaaniyadda (WMM) (Budget Outlook Paper)

- a) Warqadda Saadaasha Miisaaniyadda (Budget Outlook Paper-BoP) waxa ay u adeegtaa in lagu wargeliyo Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda (GSM) doodaha ku saabsan go'aamada muhiimka ah ee la xidhiidha miisaaniyadda sannadka soo socda iyo muddada dhexe.
- b) Waraaqdani waxay bixisaa qaab-dhismeed ku salaysan siyaasadaha ka tarjumaya horumarka dhaqaale iyo bulsho ee hadda jira.
- c) Shaqada WMM waxay badanaa bilaabataa Febraayo iyada oo ujeedadu tahay in nuqulka ugu dambeeya loo gudbiyo Guddiga Siyaasadda Miisaaniyadda (GSM) ugu dambeyn 15ka Meey.
- d) GSM wuxuu soo bandhigayaa:
 - i. Dib u eegista dhaqaalaha guud ee sannad-maaliyadeedkii hore marka loo eego natiijooyinka la filayey, siyaasadaha dawladda iyo yoolalka .
 - ii. Saadaasha doorsoomayaal dhaqaale ee muhiimka ah.
 - iii. Saadaasha dib u eegista dakhliga sanadkan.
 - iv. Fursadaha siyaasadeed ee suurtoogalka ah ee GSM ay tixgelin karaan.

Qodobka 16aad:

Diyaarinta Muuqalka Dhaqaalaha Guud (MDHG) (Macroeconomic and Fiscal Framework (MFF))

- a) Muuqaalka Dhaqaalaha Guud waa mid ka mid ah warbixinaha ay tahay in Wasaaradda Maaliyaddu ay soo saarto sannad kasta sida uu qabo Xeerkani.
- b) Ujeeddada ugu weyn ee MDHG waa in ay dejiso siyaasadaha maaliyadda iyo lacagta ee dawladda ee ku aaddan muddada dhexe.
- c) Shaqada MDHG waxay bilaabataa isla marka Waraaqda Saadaasha Miisaaniyadda (WMM) loo gudbiyo GSM waxaana loo gudbiyaa Golaha Wasiirada ugu dambeyn 30-ka Luulyo sida uu qabo Sharciga Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.
- d) MDHG Waxay soo bandhigaysaa:
 - i. Dib u eegista xaaladda dhaqaale ee sannad maaliyadeedkii hore marka loo eego natiijooyinka la filayey, siyaasadaha dawladda iyo bartilmaameedyada
 - ii. Saadaasha la cusboonaysiiyay ee isbeddelada dhaqaale ee muhiimka ah oo ku salaysan xogta cusub.
 - iii. Saadaasha dakhliga ee sanadka hadda socda, sanadka xiga iyo muddada dhexe oo dib loo eegay.
 - iv. Siyaasadda maaliyadda iyo lacagta dawladda, ujeedooyinka iyo yoolalka sannad maaliyadeedka soo socda iyo muddada dhexe.

Qodobka 17aad:

Diyaarinta Miisaaniyadda Muddada Dhexe (MMDH) (Medium-Term Budget Framework (MTBF))

- a) Miisaaniyadda Muddada Dhexe (MMDH) waxa uu bixiyaa qiyaasaha kharash tilmaamayaasha WWW kasta sannad maaliyadeedka soo socda iyo muddada dhexe.
- b) Saadaashani waxay ku salaysan yihiin siyaasadaha maaliyadeed iyo lacagta, yoolasha mudnaanta iyo saadaalinta lagu qeexay Muuqalka Dhaqaalaha Guud (MDHG).
- c) Warbixintani waxay bixisaa cabbirka miisaaniyadda dawladda iyo jaangooyada kharashyada joogtada (Budget Ceilings) ee soo noqnoqda ee WWW kasta.
- d) Jaangooyada waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in soo jeedinta miisaaniyada WWW-duhu ay yihiin kuwo dhab ah, gar ah oo u hogaansan siyaasadaha iyo bartilmaameedyada dawladda.

- e) Waaxda Miisaaniyadda & Qorshaynta ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa mas'uul ka ah diyaarinta warbixintan.
- f) Warbixintani waxaa loo gudbiyaa Golaha Wasiirada ugu dambeyn 30ka Juun sida uu qabo xeerkani, wuxuuna soo bandhigayaa:
 - i. Kharashyada mudnaanta leh
 - ii. Tirada guud ee miisaaniyadda dawladda
 - iii. Jaangooyada kharashka joogtada ah (budget ceiling) ee WWW kasta

Qodobka 18aad:

Diyaarinta Miisaaniyadda

- a) Wasiirka Maaliyaddu wuxuu diyaarinaya Qoondada Miisaaniyadda dawladda ee sannadka soo aaddan isaga oo ku saleynaya soo jeedinta miisaaniyadda WWW, oo ay la socoto sababeynta iyo xogaha ay ururiyeen saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda ugu danbeyn 31ka bisha Ogosto ee sannad walba.

Qodobka 19aad:

Ansixinta Miisaaniyadda

- a) Qoondada Miisaaniyadda dawladdu ee ay ansixiyeen Golaha Wasiirrada oo ay la socoto warbixinta Wasiirka ayaa Golaha Shacabka loo soo gudbinayaa ugu danbeyn 1da Aktoobar ee sannad walba.
- b) Golaha Shacabka ayaa ku dedaalaya tixgalinta iyo ansixinta soo jeedinta Qoondada miisaaniyadda sannadka ugudambeyn 31 da bisha Diseembar ee sannad walba.

Qodobka 20aad:

Fulinta Miisaaniyadda

- a) Wasiirku wuxuu sannad walba soo saarayaa Wareegtada Dhaqan-gelinta Miisaaniyadda wuxuuna ku faahfaahiyaa xeerarka la xiriira dhaqan gelinta miisaaniyadda.

Qodobka 21aad:

Oggolaansho Kharash Bixinta

- a) Xisaabiyaha Guud ayaa sameynaya bixinta dhammaan kharashyada ka baxaya misaaniyadda dawladda, isaga oo keliya ayaa leh awoodda ogollaashaha bixinta kharashyada ay soo

codsadaan Hay'adaha Dawladdu isaga oo faraya Bangiga Dhexe ama akoonada uu ku leeyahay bangiyada gaarka loo leeyahay in uu kharashaadkaa laga bixiyo Xisaabta Khasnadda Midaysan ee Dawladda (Treasury Single Account)

- b) Codsii kharash bixin kasta waa in marka hore oggolaansho laga haysto Xisaabiyaha Guud.
- c) Bankiga Dhexe ayaa mas'uul ka ah bixinta kharashyada sida uu u amray Xisaabiyaha Guud iyo ciddii kale ee saxiix idman ku leh xisaabta Khasnadda Midaysan ee Dawladda.
- d) Kharash bixin kasta oo la oggolaaday waa in lagu lifaaqaa dhammaan dukumeentiyada kaabaya sida ku qeexan lifaaqyada xeerkan.

Qodobka 22aad:

Kala wareejinta Qondooyinka Miisaaniyadda

- a) Iyada oo aan wax laga bedelin wadarta qoondada ee Hay'ad Dawladeed, Wasiirku waxa uu kala wareejin karaa, marka codsi kalawareejintu uga yimaaddo hoggaanka ama Sarkaalka Idman hay'addaas, sida: qoondo kharash joogto ah oo lagu wareejiyo isla kharsah kale oo joogtada ah ama kharashyada ra'asumaalka oo lagu wareejinayo isla kharashyada kale ee ra'asumaal ah.
- b) Sida xeerkani dhigayo, Wasiirka ayaa kala wareejinaya Miisaaniyadda laba hay'adood kolka la xaqiijiyo in ay jirto baahi kala wareejin ee labo hay'adood, lagana helo qoraal cad oo ka soo baxa labada hay'adood, intaa ka dib wasiirku wuxuu la socodsiinayaa Golaha Shacabka kala wareejinta qondooyinkaas.
- c) Way reebban tahay in lacag ku jirta qoondada kharashka raasumaalka loo wareejiyo midka kharashyada joogtada ah.

Qodobka 23aad:

Dhicitaanka Qondooyinka Dabayaaqada Sannad Maaliyadeedka

- a) Dhammaan qondooyinka aan la isticmaalin iyo dhammaan qaybihii miisaaniyadda ee aan la ballan-qaadin, waxa ay dhacayaan dhammaadka sannad maaliyadeedka.
- b) Dhammaan hadhaaga qondooyinka la ballan qaaday balse aan la bixin ka hor sannad maaliyadeedka dhammaadkiisa waxaa la haynayaa si loogu bixiyo balanqaadyadaas muddo ku siman soddon (30) maalmood laga bilaabo dhammaadka sannad maaliyadeedkii hore, balse waxa ay ku xidhnaan doontaa in lacag loo hayo, iyo in uu Xisaabiyaha Guud saxeexo.
- c) Diiwaan gelinta, xisaabinta iyo warbixinta lacagaha aan la bixin waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye ama Wareegtada Dhaqan-gelinta Miisaaniyadda, iyo in la xaddido taariikhda ballanqaad cusub la geli karo oo aan ka dib dhacayn tobanka Diseembar.

Qodobka 24aad:
Dakhliga Dheeriga ah

- a) Marka dakhliga soo galay uu ka bato qiyaastii miisaaniyadda maamulka ee la filayey, dakhligaa dheerigaa ah looma isticmaali karo kharash ahaan, iyada oo aan laga haysan oggolaansho Golaha Shacabka.

Qodobka 25aad:
Kharash Dheeri ah

- a) Haddii ay hay'ad dawladeed bixiso kharash dheeri ah ama ay galaan kharashyo aan Miisaaniyadda ku jirin ama aan ku jirin miisaaniyadda kabka ah ee Golaha Shacabka ansixiyeen waa kharash sharci darro ah waana in laga jaro qoondadoodii miisaaniyadda dawladda ee loogu tala galay hay'adaas sannad Maaliyadeedka xiga marka Golaha Shacabku ogalaadaan.

Qodobka 26aad:
Qoondaynta Lama Filaanka ah

- a) Golaha Shacabka ayaa ansixin doona qoondada u tooghaynta ku-talagalka aan la fileyn oo aan ka badneyn 5% wadarta guud ee dakhliga gudaha, sida lagu saadaaliyey Muuqaalka Miisaaniyadda Guud (MDHG) oo loogu talo galayo in uu daboolo kharash ay baahi deg deg ahi keentay ama kharash aan hore loo sii saadaalin oo aan ku-talogal kale ugu jirin Miisaaniyadda.
- b) Kharashka degdegga ah waxa lagu bixin karaa oggolaanshaha Wasiirka Maaliyadda, oo ka wareejin kara lacagaha ku jira Qoondaynta Lamafilaanka ah marka ay lacag dheeri ah ay u baahato hay'ad Dawladeed oo aan ku jirin ku-tala galka miisaaniyadda sida ku cad xeerka qoondada Miisaaniyadda.

Qodobka 27aad:
Miisaaniyad Kaabis

- a) Haddii sannad maaliyadeed gaar ah, la ogaado in xaddiga la qoondeeyey aanu ku filnayn ama ay soo baxdo baahi aan wax kharash loo qoondeyn, waxaa la diyaarin doonaa qoondada miisaaniyad kaabis ah oo daboolaysa xaddiga looga baahanyahay, waxaana ansixindoona Golaha Shacabka si loo helo qoondo xeer ku dhisan.
- b) Miisaaniyadda kabka ah, waxa ay kordhin kartaa wadarta kharashyada ku xusan asalka Miisaaniyadda hore.

- c) Marka keliya ee la kordhin karo wadarta kharashyada waa haddii ay jirto:
- Gurmad qaran oo deg deg ah, dagaal ama xaalad kale oo dhaqaale iyo maaliyadeed oo aan horay loo saadaalin (cir ka soo dhac ah) ama
 - Maalgalin sare loogu qaado dakhliga maamulka.

Qodobka 28aad:
Miisaaniyad Gaar ah

- d) Dawladdu waxay diyaarin kartaa miisaaniyad gaar ah markii loo baahdo oo loogu talagalay horumarinta dhaqaalaha, arrimaha bulshada iyo kharashaadka gaarka ah, waxaana laga ansixindoonaa Golaha Shacabka.
- e) Miisaaniyadda gaarka ah waa in lagu daraa:
- Dhammaan dakhli loo heli karo ujeedooyinka miisaaniyadda gaarka ah oo ay ku jiraan qoondada miisaaniyada guud ugu jira, dakhliga ka soo baxa deymaha gudaha iyo dibadda, qaaraanka ay bixiyaan dawlado kale ama ururo caalami ah iyo lacag kasta oo kale.
 - Dhammaan kharashyada la xidhiidha mashaariicda loo qabtay ujeedooyinka la sheegay, oo ku salaysan helitaanka lacagta.
- f) Haddii lacagta buuxda ee ku cad miisaaniyada gaarka ah, ee ku saabsan mashruuca aan la bilaabin ama la dhamaystirin, aan laga faa'iidayaan sanad xisaabeedka, hadhaaga waa in loo diyaariyaa isla mashruuca iyada oo aan lagu muujin miisaaniyad gaar ah sanad xisaabeedka soo socda.

Qodobka 29aad:
Miisaaniyadda Ku Meelgaadhka (Vote on Accounts)

- a) Haddii Golaha Shacabku meel marin waayo miisaaniyadda maamulka ka hor bilowga sannad maaliyadeedka Dawladda (1da Janaayo), waxaaa xeerkan iyo Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud, Xeer Lr1, 2023 ogalaanayaa in si ku meelgaadh ah loo isticmaalo miisaaniyadda muddo aan ka badneyn saddex bilood.
- b) U codeynta Xisaabta (Vote on Account) ee miisaaniyadda waxaa saldhig u noqonaya ku talogalkii qoondada miisaaniyadda sannadkii hore.
- c) Inta lagu guda jiro muddada isticmaalka ku meelgaadhka ah ee miisaaniyadda, awoodsiinta kharas hbixintu (Expenditure Warrants) waa in ay ku xaddidan yihiin 1/12 wadarta guud ee kharashka loo qoondeeyey madax-xigeen kasta ee qoondada miisaaniyadda bil kasta oo ka mid ah muddada ogalaanshaha ku meelgaadhka ah.

- d) Marka kharashku leeyahay mudo xaddidan oo lagu bixinayo ay ku soo aado waqtigan isticmaalka ku meelgaadhka ee miisaaniyadda, waa suuro gal in la bixiyo dhammaan wadarta kharash bixinteedu waajibtey, balse haddii wakhtiga bixinteeda ka baxsan yahay muddada ku xusan qodobka (a), lacagtaas waa in aan la isticmaalin aanna la bixin.
- e) Kharashyada la bixiyey muddada lagu jiray kharash bixintan ku meelgaadhka ah ee miisaaniyadda waa in ay noqdaan qeyb ka mid ah ogalaanshaha miisaaniyadda ee sannad miisaaniyadeedkaas.

Qodobka 30aad:

Xisaabinta iyo Waxbixinta Miisaaniyadda

- (a) Sarkaal kastoo Idman oo u xilsaaran maaliyadda iyo xisaabta hay'daha dawladda waa in uu warbixin bille ah oo ku saabsan dakhliga iyo kharashka hay'addaas u soo gudbiyaan Xisaabiyaha Guud muddo toddoba maalmo-shaqo gudahood, marka bishu dhammaato iyadoo la raacayo qaabka uu caddeeyey Xisaabiyaha Guud.
- (b) Sarkaal kastaa waa in uu warbixin 3 biloodle ah u soo gudbiyo Xisaabiyaha Guud, ayadoo la raacayo habraacyada Xisaabiyaha Guud.
- (c) Xisaabiyaha Guud waxa uu diyaarin doona warbixinta xisaabxidhka, wuxuuna u gudbin doona Wasiirka iyo Golaha Wasiirrada ugu dambeyn 31ka Maarso.
- (d) Xisaabxidhka sanadlaha ah ee uu diyaariyo xisaabiyaha guud waxa lala wadaagayaa Hantidhowrka Guud saddex bilood gudahooda kaa bilaabmeysa 31ka bisha Diseembar kuna eg 31ka Maarso.

Qodobka 31aad:

Dib u eegista Warbixinta Maaliyadeed

- a) Hantidhowrka Guud ee dawladdu wuxuu qiimeynayaa in howlaha maaliyadda dawladdu ee sanadka dhammaadey ay waafaqsan yihiin Miisaaniyadda Baarlamaanku ansixiyay.
- b) Xisaabxidhka sanadlaha ah ee uu diyaariyo Xisaabiyaha Guud waxa lala wadaagayaa Hantidhowrka Guud afar bilood gudahooda kaa bilaabmeysa 31ka bisha Diseembar kuna eg 30ka Abriil.
- c) Hantidhowrka Guud wuxuu baadhayaa warbixinta xisaabxidhka maaliyadeed ilaa dhammaadka bisha Juun si uu u dhamaystiro xisaabinta iyo xaqiijinta hawlaha maaliyadeed ee dawladda.

d) Natiijada ka soo baxday Hantidhowrka oo ay wehliyaan xisaabxidhka ayaa waxaa lala wadaagayaa Wasiirka Maaliyadda, Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha Baarlamaanka iyo Hantidhowraha Gudaha ee Wasaaradda Maaliyadda.

DRAFT